

Dhaxalside

# Ubadka Iyo Isbedelka Cimilada

Agoosto 2024

# Tusmada Buuga


| | |
|---|---|
| Cutubka 1aad: Hordhac | 1 |
| Cutubka 2aad: Saameynta Isbedelka Cimilada | |
| (Bad iyo Berri) | 14 |
| Cutubka 3aad: Wax ka qabashada | |
| isbedelka cimilada | 21 |
| Gunaanad | 32 |

# MAHAD-NAQ

Annagoo ah maamulka iyo dhammaan shaqaalaha hay'adda Action for Environment (A4E) waxa aannu u mahadnaqaynaa hay'adda OXFAM Somalia iyo African Activists for Climate Justice (AACJ) oo door muhiim ah ka qaatay hirgalinta dhigaalkan si uu u gaaro abaartii loogu tala galay buuggaani islama markaana hage u noqdo ubudka Soomaaliyeed ee soo kacaamaya.

Annagoo ah maamulka iyo dhammaan shaqaalaha Hay'adda Action for Environment (A4E) waxaan sidoo kale mahad-celin ballaaran la wadaagaynaa dhammaan cid walba oo ka qayb-gashay hirgalinta dhigaalkan mid daalacan ama dedan.
Dhanka kale, waxa aannu u mahadnaqaynaa shirkadda daabacday dhigaalkan oo ah shirkadda daabacaddaha ee Beder Printing House.

# Gogol Dhig

Naga guddooma salaam idin kaga timid hay'adda Action for Environment (A4E) oo ah hay'ad ka shaqeysa ilaalinta deegaanka iyo wax ka qabashada isbedelka cimilada. Action for Environment waxaa la aasaasay sannadkii 2016-dii. Hay'adda waxa ay diiradda saartaa cilmi baarista, wacyigalinta bulshada, wax ka qabashada isbedelka cimilada iyo u ololeynta siyaasadaha la xidhiidha ilaalinta deegaanka iyo isbedelka cimilada. Hay'adda Action for Environment waxa ay fulisaa hindisooyin dhowr ah oo dhammaantood looga gol leeyahay sare u qaadida wacyiga bulshada. Hindisooyinkaasi waxaa ka mid ah: Daango iyo Deegaan, Naadiyada Deegaanka Iskuulada iyo Shirweynaha Deegaanka Muqdisho. Hindisooyinkaas waxaan ku soo kordhinnay soo saaridda dhiganahan oo aan ugu magac darnay Dhaxalside. Dhiganahani waxa uu ka kooban yahay saddex cutub oo si waafiya uga faaloonaya ilaalinta iyo dhawrista deegaanka iyo xaqiijinta dhammaan noolayasha ku dul nool. Buugani waxa uu saldhig u noqonayaa ubadka Soomaaliyeed si loo baritaaro/kabo garaadkooda aqooneed ee deegaanka iyo ilaalintiisa.

Dhanka kale, buugani waa hage aan ugu tala galnay in carruurtu si waafiya u fahmaan arrimaha deegaanka iyo isbedelka cimilada. Waxa uu ku jaan-goa`an yahay ujeedooyin horumarka waara gaar ahaan ujeedooyinka 3aad, 4aad, 6aad, 7aad, 13aad, 14aad, iyo 15aad. Waxaan ku faraxsannahnay in aan taageerno hindisaha soo saaridda dhiganahaan oo ah hindise u adeegaya kobcinta wacyiga caruurta ee ku aadan arrimaha deegaanka iyo isbedelka cimilada.Dunida oo xeligaan ladaalaa dhaceysa saamaynta isbedelka cimilada darteed, buugani waxa uu caruurteenna ka caawin doonaa in ay fahmaan muhiimadda ilaalinta deegaanka uu u leeyahay nolosheenna, islamarkaana caruurta waxa uu tusi doonaa in ilaalinta deegaanka ay tahay masuuliyad wadareed saaran muwaadin kasta oo ay caruurtu kamid yihiin. Caruureey waxaad ogaataan in hawada aynu neefsanno, biyaha aynu cabno, xayawaanka aynu dhaqanno, iyo dhirta aynu hadhsanno inay dhammaantood u baahanyihiin taageeradeena. Waxaan idin ku dhiiri galinaynaa in aydan fududeysanin talaabooyinka qaarkood ee aad deegaanka ku ilaalineysaan sida daminta leydhadhka xilliyada aan la isticmaaleynin, dhir beerista, yareynta isticmaalka bacaha, tashiilida isticmaalka biyaha, wacyigalinta, iwm. Caruureey waad ku mahadsantihiin inaad nagula soo biirtaan socdaalkan, si aannu si wadajir ah ugu gogol xaadhno mustaqbal ifaya, cagaaran, oo leh horumar waara.

Mahadsanidiin
Abdilatif Hussien Omar
Aasaasaha ahne Agaasimaha Guud,
Action for Environment

# AFEEF

Annagoo ah maamulka iyo dhammaan shaqaalaha Hay'adda Action for Environment (A4E) si guud iyo gaar ba waxa aan afeefanynaa khaladaad walba oo naga dhacay intii lagu jiray hirgalinta dhiganahan/buuggan, khaladaadkaas oo aan ahayn mid ku talo gal ah.

Bini aadamku waa hilmaame oo si sahlan ku ilaawi kara wax kasta, taasi waa micnaha guud ee magaca insaan (hilmaam), hase ahaate ma hilmaame waa Alle (SW) oo dhamays ah.  Hubaashii arrin kasta oo deegaanka la xidhiidha oo dhigaalkan aan ku jirin uguma tagin si ku talo gal ah.

# Cutubka 1aad

## 1.0 Hordhac


Maanta waxaa dunida oo dhan ka taagan hadal-haynta ku saabsan dhibaatooyin deegaan oo nolosha qeyb kasta oo ka mid ah saameeyay sida: isbeddelka cimilada, wasakhowga; hawada, biyaha, carrada, sarakaca heer-kulka, tayodhaca deegaanka, nabaadguurka, xaalufin dhirta, daadadka, abaaraha iwm.

Wax ka qabshada dhibaatooyinkan waxa ay u baahan tahay dadaallo wadajir ah oo ay dadyowga dunida oo dhami qeyb ka yihiin, si xal waara looga gaaro.

Marka ay noqoto wax ka qabshada arrimahan, waxbarashada deegaanku waa qodob weyn oo lagama maarmaan u ah xallinta dhibaatooyinkan si xaaladda loo wanaajiyo, waxaa lagama maarmaan ah in kor loo qaado wacyiga bulshada, lana dhiirrigeliyo isbeddelka hab-dhaqanka dadka ee ku aaddan deegaanka. Waxbarashada deegaanka ayaa si gaar ah muhiim ugu ah ardayda dugsiga hoose/dhexe si loo jiheeyo wacyiga ubadka ee deegaanka. Waa taas ujeeddada buuggan oo looga golleeyahay in ummadda Soomaaliyeed ay qeyb ka noqoto dadaallada caalamiga ah ee deegaanka lagu dhowrayo.

## 1.1 Deegaanka

Deegaanku waa wax kasta oo nagu xeeran oo isugu jira noole iyo manoole sida ciidda, biyaha, hawada xoolaha, dhirta iwm. Dee-gaanku waxa uu door muhiim ah ka cayaaraa jiritaanka nolosha dhulka, waxaana laga helaaa asaasiyaadka nolasha sida biyaha, cuntada, hoyga, iwm.



## Qaybaha Deegaanka

Deegaanku waxa uu koobayaa wax kasta oo nagu xeeran, oo ay ku jiraan kuwa nool iyo kuwa aan noolaynba.

### Qaybaha Nool:

**Dhirta:** Waxay soo saaraan ogsajiinta iyo cuntada iyagoo adeegsanaya nidaamka photosynthesis, taasoo aasaas u ah silsiladaha cuntada.


**Xayawaanka**: Laga soo billaabo noolaha yar yar ilaa naasleyda waaweyn, waxay la falgalaan midba midka kale iyo dhirta, waxa ayna muhiim u yihiin badqabka deegaanka.

**Ilma-aragtada:** Bakteeriyada, fangaska, iyo noolaha kale waxay door muhiim ah ka ciyaaraan burburinta nafaqada, nadiifinta deegaaanka iyo tayaynta carrada.



## Qaybaha aan Noolayn:

Hawada, Biyaha (badaha, webiyada, harooyinka, iyo biyaha dhulka hoose.), cimilada iyo carrada.



## Saamaynta Aadanaha

Bini'aadanku waxa ay si weyn u saameeyaan deegaanka iyagoo adeegsanaya hawlo ay ka mid yihiin:

**Magaalaynta:** Horumarinta magaalooyinka iyo kaabayaasha dhaqaalaha.

**Beeraha**: Beeralaydu waxa ay saameeyaan isticmaalka dhulka iyaga oo dhul keymo ah beera u beddelaya.

**Warshadaha**: Nidaamyada wax soo saarka ee dhaliya wasakhowga iyo qashinka.

**Isticmaalka Khayraadka:** qodista macdanta, jarista dhirta, iyo hawlaha kale ee xaalufiya khayraadka dabiiciga ah.



# Isbedelka Cimilada

Waa isbedel mudda dheer qaata ee ku yimaada qaabkii ay cimiladu u shaqeyn jirtay sida xilliyada roobka, abaaraha, heer-kulka, iwm. Isbeddelka cimiladu wuu ka duwan yahay isbeddellada maalinlaha ah ee aan sida caadiga ah u dareeemi karno (cimilo gooreed). Waxaa qeyb weyn oo ka mid ah sababteeda leh waxyeellada dadku u geystaan deegaanka sida qiiqa hawada, jarista dhirta, iwm.



# Diirimaadka Dunida

Waa sara-u-kac ku yimaaday diirrimaadka dhulka iyada oo gaasaska uu ka koobnaa gibilka dhulka (atmosfeerka) ku hareereysan ay kordheen, taas oo ay ugu wacan tahay saameynta neefaha dikheeya hawada, sida carbon dioxide, methane, nitrous oxide, iyo uumiga biyaha.



# Cadaaladda iyo Isbedelka Cimilada

Cadaaladda cimiladu waa hab loo wajaho wax ka qabashada cimiladda oo saamayn aan loo wada sinnayn ku yeelatay dadka ladan iyo kuwa nugul. Waxaa lagu raadinayaa in la helo qaybsi siman, iyada oo la isku dheellitirayo culaysyada isbedelka cimilada ka dhashay iyo dadaalka lagu dhimayo. U jeedka ayaa ah in qof waliba uu ku noolaado deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba loona simanyahay.



**Kaymaha:** Dhul ballaaran oo ay ku badanyihiin geedo waaweyn iyo dhir kale, oo hoy u ah duurjoogta kala duwan.

**Saxaraha**: Waa dhul oomana ah oo leh dhir aad u yar, oo la qabsaday xaaladaha daran ee biyo yarida.

**Nidaamyada Biyaha:** Waxa ay isugu jiraan biyaha macaan (wabiyada iyo harooyinka) iyo biyaha dhanaan (badaha).

# 1.2 Dhibaatooyinka Deegaan ee Soomaaliya

Dhibaatooyinka deegaanka ee Soomaaliya waxa ay taabanayaan dhinacyo badan kuwaas oo saameynaya nidaamyada deegaanka, hab-nololeedyada, iyo guud ahaan hanaanka nololeed ee dalka.

## Isbeddelka Cimilada

**Abaaraha:** Abaaraha soo noqnoqda iyo kuwa daba dheeraada waxa ay sababaan biyo la'aan, dalaggii beeraha oo gabaabsi noqda, iyo dadkii oo xoolo beela.



**Daad:** Roobab mahiigaanka ah iyo dhacdooyinka cimilada aadka u daran waxay sababaan daadad, waxyeello u geysta kaabayaasha dhaqaalaha iyo waxsoosaarka beeraha.




## Xaalufinta Dhirta

**Ka Ganacsiga Dhuxusha:** Dhaqanka baahsan ee ka ganacsiga dhuxusha ee dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba loo dhoofiyo waxa uu horseeday xaaluf ballaaran ee dhirta ku dhacay.

**Ballaarinta Beeraha:** In si qorsha la'aan ah dhulkii kaymaha ahaa beero loogu beddelo waxay yaraynaysaa xaddiga kaynta iyo kala duwanaanshaha noolaha.

**Xaalufka dhul-daaqsinka:** Maareyn la'aanta dhuldaaqsimeedka iyo daaqsinta xad-dhaafka ee xooluhu waxay xaalufiyaan daboolka dhirta, taas oo keenta nabaad guurka ciidda.

**Beeraha aan joogtada ahayn:** Dhaqanka beeralayda ee aan xil iska saareyn deeganka waxay hoos u dhigayaan tayada ciidda, taasoo dhulka ka dhigaysa mid aan waxsoosaar lahayn.



# Biyo-yarida iyo Wasakhowga

**Helitaanka biyo nadiif ah oo xaddidan:** Qeyb weyn oo bulshada ka mid ah ayaan helin biyo nadiif ah oo la cabbo, taas oo saamaynaysa caafimaadka iyo nadaafadda.

**Wasakhowga Biyaha:** Qashinka ka yimaada magaalooyinka iyo haraadiga bacrimiyaasha beeraha oo aan la maareyn ayaa wasakheeya ilaha biyaha.



# Dabargo'a Noolaha

**Burburinta Deegaanka:** Xaalufinta dhirta, xaalufka dhulka, ugaarsiga iyo magaalaynta ayaa burburisa tayada degaannada, waxa ayna dhaliyaan in ay duurjoog badan dabar go'aan.

**Kalluumeysiga Xad Dhaafka ah**: kalluumeysiga aan cilmiga ku dhisnayn waxa ay xaalufiyaan kheyraadka badda, taasoo saameysa kala duwanaanshaha noolaha ee badda.



# Maareyn La'aanta Qashinka

Hab-dhaqannada maaraynta wasakhda ee liita waxay horseedaan wasakhowga deegaanka, waxa ayna dhaliyaan khataro caafimaad.



# Nabaad Guurka Xeebaha

Heerarka badda ee kor u kacaya, isbeddelka cimilada oo keenay kor u kaca heerka badda iyo dabeylaha oo kor u kaca ayaa sababa nabaadguurka xeebaha, khatar ku ah bulshooyinka xeebaha ku dhaqan iyo kaabayaasha.



# Cutubka 2aad: Saameynta Isbedelka Cimilada (Bad iyo Berri)

## 2.0 Hordhac

Isbedelka cimilada waxaa sababa arrimo isbiirsaday oo dabiici iyo kuwa dadku samayay isugu jiro sida gubista shidaalka fosilka, xaalufinta dhirta, iyo hababka warshadaha, kuwaa oo isbeddel weyn ku keenaya nidaamka cimilada dhulka taa oo saameyn ballaaran ku keentay qeybaha kala duwan ee nolosha sida cafimaadka, dhaqaalaha, Beeraha, Badaha, iwm.


Waxaa isbedelay hanaankii roobabku u di'i jireen, waxaana ka dhashay daadad iyo abaaro soo noqnoqda, iyadoo ay sii kordhayaan duufaannada iyo khataraha kale ee cimilada la xariira.

Dhalaalka barafka iyo lumita barafka badda Arctic , ayaa gacan ka geysta kor u kaca heerka badda, taas oo iyaduna keenta nabaad guurka xeebaha iyo daadad, khatarna ku ah bulshooyinka xeebaha iyo nidaamyada deegaanka.

Dhaqaale ahaan, saamaynta isbedelka cimilada waxaa ka mid ah burburka kaabayaasha dhaqaalaha, kororka kharashka gargaarka musiibooyinka ku baxa. Bulsho ahaan iyo siyaasad ahaanba, isbedelka cimiladu waxa uu keenaa kheyraad yari, barakac iyo iska hor imaadyo, si aan xad lahayn u saameeya nolasha.

# 2.1 Saameynta Caafimaadka

Marka la fiiriyo saameynta caafimaad ee isbedelka cimilada waxaa jira xanuuno si fudud ku faafa, kuwa neefmareenka ku dhaca oo tayaxumada hawada ka dhasha iyo dhimasho toos ah oo ka dhalato isbedelka cimilada sida: daadadka, duufaanada, kuleylka, qabowga iwm.



## 2.2 Saameynta Beeraha

Isbedelka cimiladu waxa uu saameyn daran ku yeeshay dhulbeereedkii, hanaanka tacbashada, tayada carrada, waxaa kordhay cayayaanada dalaga dhibaateeya, waxaana hoos u dhac ku yimid wax sooo saarkii dalaga, taa oo waxyeelo ku keentay habnololeedkii beeraleyda iyo haqab-beelka cunada. Waxaa sidoo kale kordhay baahida waraabka. Abaaraha soo laalaabta ee isbedelka cimilada qeyb ka ah waxa ay kordhiyeen baahida waraabka ee dalaga taa oo kordhinaysa qiimaha wax soo saarka beeraha.



## 2.3 Saameynta Xoolaha

Isbedelka cimiladu waxa uu si weyn u saameeyaa xoolaha nool ee Soomaaliya, taas oo culays ku ah xoolaha iyo bulshooyinka ku tiirsan noloshooda. Waa kuwan qaar ka mid ah saamaynta uu reebo

**Abaaraha**: Abaaraha daba dheeraaday waxa ay yareeyeen helitaanka baadka iyo biyaha ee xooluhu ku noolaayeen, taas oo keenta hoos u dhaca ku yimaada taranka, tayada iyo wax soo saarka xoolaha sida hilibka iyo caanaha.

**Daaq**: Isbedelka cimiladu waxa uu saameeyaa dhul daaqsimeedka taa oo horseeda hoos u dhac ku yimaada tayada iyo tirada daaqa, taas oo cariiri gelinaysa helitaanka, sidoo kalena dhalinaysa nafaqo-xumo soo food saarta xoolaha nool.

**Cudurada:**Isbeddelka xaaladaha cimilada waxay horseedi karaan faafitaanka cudurrada iyo dulinnada saameeya xoolaha, sida cudurrada shilinta iyo cayayaanada lamid ah laga qaado.

**Dhaqaalaha**: Isbeddelka xaaladaha cimilada waxay horseedi karaan hoos u dhaca ku yimaada Waxsoosaarka xoolaha (cad iyo caano), heerka dhalmada xoolaha oo yaraada, iyo heerka dhimashada oo sarreeya ayaa hoos u dhigaya qiimaha dhaqaale ee xoolaha la dhaqdo.

Waxa ay arrimahaani dhalinayaan sicir bararka maciishada, barakaca dadkii xoolaha dhaqatada ahaa, colaado loolanka baadka ka dhasha iyo noloshii miyiga oo soo dunta.



# 2. 4 Saameyta Badaha

Isbedelka cimiladu waxa uu saameyn ku yeeshay Badaha oo iyagu muhiim u ah nolol maalmeedka dadyowga xeebaha ku dhaqan, waxaa kordhay heerkulka badda, waxaa isbedelay tayada biyaha badda sida heerkooda cusbada, waxaa tayo ahaan iyo tiro ahaan lumay deegaanadii muhiimka u ahaa taranka iyo barbaarinta kaluunka, taa oo saameyn ku yeelatay nolosha badda. Isbedeladan deegaan waxay sababeen luminta deegaano muhiim ahaa, iyo hoos u dhac ku yimid kala duwanaanshaha noolaha badda.



# 2.5 Sameynta Kheyraadka Biyaha

Isbedelka cimiladu waxa uu khatar ku yahay tayada iyo waarida ilaha biyaha iyada oo ay sii kordhayaan wasakhowga biyaha, hoos u dhaca helitaanka biyaha iyo cusboobida biyaha nadiifka ah, taa oo saameyn taban ku yeelanaysa caafimaadka dadka, duunyada, badqabka iyo guud ahaan dadaallada lagu ilaalinayo tayada biyaha.

## Tayada Biyaha

Tayada biyaha waxaa lagu cabiraa nadiif ahaanshaha iyo bedqabka isticmaalka biyaha iyada oo laga eegayo sifooyinka biyaha tayadooda go'aamiya ee muuq ahaan, kiimiko ahaan iyo bayooloji ahaan. Ilaalinta tayada biyahu waxa ay muhiim u tahay caafimaadka dadka, joogtaynta nidaamka deegaanka, iyo guud ahaan bulshada. Waxaa jiro arimo kala duwan oo saameyn ku yeesha tayada biyaha sida cimilada, nabaad-guurka, deegaameyta, beeraha, iyo maareyn la'aanta qashinka taa wasakheynaysa illaha biyaha dabiiciga ah sida harooyinka, balliyada, biyoqabadyada, webiyada, iyo badaha,

## Loolanka ka Dhasha Helida Biyaha

Isbedelka cimiladu waxa uu soo kordhiyay loolan iyo colaado salka ku haayo kheyraadka dabiiciga ah gaar ahaan biyaha, illihii laga heli lahaa iyo sidii si siman loogu wada heli lahaa.

Waxaa muran badan ka taaganyahay biyaha xuduudaha isaga goosha, iyada oo lagu tartamayo sidii hadba qolo waliba u heli lahayd qeybta ugu badan ama uga badsan lahayd qolada kale oo ay kala dhexeeyaan taa oo colaado biyaha kadhasha keeni karta. Hadaba waxaa loo baahanyahay fahmida khatartaa biyaha ku xeeran iyo tabihii biyaha lagu beeqaamin lahaa.



## 2.6 Saameynta Carrada

Waxaa jira dhowr siyood oo dadku dhulka u wax yeeleeyaan sida xaalufinta dhirta taas oo keenta dhibaatooyinka uu carroguur-ku ka mid yahay. Carroguur-ku waa lumida carrada qeybteeda kore ee hodonka (fertile) ah, iyada oo biyaha ama dabeysha raacaysa, taa oo caqabad ku ah wax soo saarka beeraha, korintaanka dhirta iyo guud ahaan caafimaadka deegaanka.

# Cutubka 3aad: Wax ka Qabashada Isbedelka Cimilada

## 3.0 Hordhac

Wax ka qabashada isbedelka cimiladu waxa ay u baahan tahay dadaalo dhowr ah sida yaraynta, la qabsiga, iyo xeeladaha maaraynta. Dadaallada yaraynta waxa ay diiradda saaraan yaraynta qiiqa gaasaska iyada oo loo marayo dhiirogelinta tamarta nadiifka ah ee la cusboonaysiin karo, kor u qaadista waxtarka tamarta, beeqaaminta tamarta, dhiraynta, iyo kor u qaadida hanaanka beeraha iyo warshadaha ee waara.

Xeeladaha la qabsiga waxaa ka mid ah dhisidda u adkeysiga saameynta isbedelka cimilada ee bulshada iyadoo la hagaajinayo kaabayaasha dhaqaalaha, fulinta qorshayaasha u diyaargarowga musiibada, iyo maareynta kheyraadka dabiiciga ah si loo xaqiijiyo ammaanka biyaha iyo cuntada.

Maareynta isbedelka cimilada ee waxtarka leh waxaa ka mid ah horumarinta siyaasadaha cilimida, iskaashiga caalamiga ah, iyo tixgelinta isbedelka cimilada ee dhammaan heerarka go'aan qaadashada, dejinta qorshe qaran oo ujeedadiisu tahay dhowrista deegaanka iyo wax ka qabashada isbedelka cimilada.

# 3.1 Ilaalinta Deegaanka

## Nadaafada

Tabaha deegaanka lagu dhowro waxaa ka mid ah ilaalinta nadaafada iyo ka shaqeynta badqabka deegaaanka, hadaba waa in la helaa dadaalo abaabulan oo degaanka qashinka looga saarayo iyada oo xooga la saarayo, goobaha dadweynaha, meelaha dabiiciga, si kor loogu qaado bilicda iyo bedeqabka deegaanka, iyada oo loo marayo hindise bulsho iyo maareynta qashinka ee wax ku oolka ah.



# Dhir Beeris

Dhirbeeristu waxa ay ku jirtaa tabaha ugu mudan ee cimilada wax looga qaban karo, hadaba waxaa muhiim ah in la hir geliyo olole dhirbeeris oo dhiig joojin ah, si kor loogu qaado, kala duwaananta nolosha, tayada hawada, caafimaadka guud ee deegaanka, loogana hor tago nabaadguurka iyo sara u kaca kulka.



# Maareynta Qashinka

Waxaa jiro hab dhamaystiran oo qashinka tirada badan wax looga qaban karo: yaraynta qashin soo saarka, dib u adeegsi badeecada iyada oo looga faa'iidaysanayo udeegsiga ujeedo kale, iyo dib u farsamaynta qashinka iyada oo laga soo saarayo agab cusub oo wax ku ool ah. Hirgelinta tabahaan waxa ay yarayn karaan qashinka iyo saamayta uu deegaanka ku yeesho, sidoo kale waxa ay kor u qaadikaraan ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah.



# 3.2 Tabaha Wax ka Qabashada Isbedelka Cimilada

U ololeynta deegaanku waa dadaal muhiim ah oo lagu ilaalinayo deegaanka laguna xaqiijinayo mustaqabal lagu noolaan karo oo kan maanta ka tayo sareeya. Ololaha waxaa ka mid noqon karo; dejinta siyaasad wax looga qabanayo cimilada iyo hirgelinteeda, wacyigelin dhiiro gelinaysa dhaqamada nololeed ee waara kana qeyb-qaadanaya yareynta saameyta isbedelka cimilada.

## Waxbarashada Asaasiga ah

Hubaashii isbedelka cimilada nidaamyada wax looga qaban karo waxaa ka mid ah in aqoonta deegaanka ku saabsan lagu daro manaahijta waxbarshadda asaasiga ah ee caruurta, arrintaasi waxa ay fududeyn karta fahanka cilmi ahaan ka danbeeya isbedelka, barashada saameynta isbedelka cimiladu ku yeelatay dadka iyo deegaanka,  kor u qaadida xeeladaha lagu dhimayo isbedelka sida hagaajinta waxtarka tamarta nadiifka ah, kor u qaadista gaadiidka dadweynaha, wanaajinta dhaqamada shaqsiga ah iyo kuwa guud ee gacan ka geysan karo dadaalada lagu dhimayo saameynta isbedelka cimilada.



## Farshaxanka

Farshaxanka waxa aan u adeegsan karnaa soo bandhigista iyo faafinta farriimaha wax ku oolka ah ee ku saabsan wax ka qabashada isbedelka cimilada si bulshada loogu jiheeyo la jaanqaadka isbedelka iyo ka shaqeyta mustabal waara.



# Naadiyada Deegaanka

Yagleelidda iyo ka mid noqoshada naadiyada arrimaha deegaanka ka shaqeeya waxa ay lama huraan u tahay ka wada shaqeynta hindisayaasha wax looga qabanayo isbedelka cimilada, wadaagista iyo faafinta aqoonta cimilada iyo qaadista taalaabooyin wada jir ah oo lagu xaqiijin karo deegaan nadiif ah iyo mustaqabal cagaaran.



# 3.3 Samo ka Talinta Iyo Xil Iska Saarista Deegaanka

Xil iska saarista arrimaha deegaanka waxa ay dhalin kartaa in aynu qaadano hab-nololeed mudnaan siinaya deegaanka sida: dhowrista nadaafadda, maareynta qashinka, dib u adeegsiga waxyaaha qashinka kordhin kara, masuuliyad iska saarista danta guud, dhir beerista iyo sidii loo dhowri lahaa caafimaad qabka deegaanka si isbedelka wanaagsan loo dhaliyo.

## Habdhaqan Masuuliyad Leh

Waxaa jiro habdhaqano yar yar oo hadii aan wax ka bedelno horseedi karo saameyn iyo guulo muhiim ah oo deegaanka lagu ilaalin karo.



## 3.4 Taageerista Tamarta Nadiifka Ah

Waxaa muhiim ah in aan si wax ku ool ah ugu qareeno sidii loogu guuri lahaa tamarta nadiifka ah ee la cusboonaysiin karo sida: sida tamarta laga dhaliyo cad ceeda, hawada iwm. Sidoo kale waa in aan bulsho ahaan adeegsanaa oo dhiiri gelinnaa agabka tamarta beeqaamiya.



# 3.5 Hindise Bulsho

Waxaa muhiim ah in aan bulsho ahaan hal abuurno mashaariic maxalli ah oo ay dadka deegaanku garwadeen ka yihiin, kuwaa oo ujeedadooda kobaad tahay wax ka qabshada cimilada, iyada oo xooga la saarayo waxbarashada ubadka iyo sidii loo waafajin lahaa illaalinta deegaanka, wax ka bedelidda habdhaqanada aan haboonayn ee deegaanka lagu waxyeeleeyo, isla markaa la dhiiro geliyo dhaqamada togan ee deegaanka utaamaynaya sida beeqaaminta biyaha iyo korontada, dhirbeerista, meelaynta qashinka, hal abuuro deegaanka loogu ololeynayo iwm.



## Yoolalka Horumarka Waara

Yoolalka Horumarnka Waara waa 17 yool oo caalami ah iskuna xiran waxaa dejiyay Golaha Guud ee Qaramadda Midoobay sanadkii 2015ki. Waxay qayb ka yihiin hiigsiga 2030 ee Horumarinta Joogtada ah, ujeedkeeduna yahay hagidda iyo waxka qabashada caqabadaha kala duwan ee caalamiga ah iyada oo la ilaalinayo Deegaanka.



# Gunaanad

Caruureey waxaan filaynaa inaad wax badan ka kororsateen buugan oo aad faham fiican ka hesheen ilaalinta deegaanka iyo wax ka qabashadaa isbeddelka cimilada.

Waxaan mar kale idin xasuusineynaa in aadan yareysanin ficil kasta oo wax ku ool ah oo aad ku ilaalin kartaan deegaanka. Tallaabooyinka yaryar ee aad deegaanka ku ilaalineysaan waxay horseed u noqonaayayaan helida deegaan badqaba, nadiif ah oo caafimaad leh.

Ilaalinta deegaanka iyo wax ka qabashada isbeddelka cimilada waa masuuliyada wadareed oo bulshada qeebaheeda kala duwan laga doonayo sida ragga, dumarka, dhallinyarada iyo caruurta intuba.

Caruureey tallaabooyinka aad maanta ku ilaalineysaan deegaanka waxa aad miraheeda guran-doontaan marka aad weynaatataan, sidoo kalane jiilasha idin ka dambeeya ayaa miraahaas guran doona.

Caruureey joogteeya waxbarashada guud ahaan, gaar ahaan mida la xidhiidha ilaalinta deegaanka iyo wax ka qabashada isbeddelka cimilda. Ku baratama hindisooyinka lagu ilaalin karo deegaanka, iskuna kaashada shaqooyinka iyo tallaabooyinka ilaalinta deegaanka iyo wax ka qabashada isbedelka cimilada.
Hadaynu iskaashanno wax badan ayaan dalkeena iyo deegaankeena u qaban karnaa.!

Deegaankeena Waa Nolosheena!

Mahadsanidiin

## Qoraayaasha Buuga

Daud Ali Ulusow
Abdilatif Hussein Omar
Abdirahim Mohamed Hassan
Hassan Abdi Hassan

OXFAM

A4E ACTION4ENVIRONMENT

African Activists for Climate Justice

## Contact Us

(+252) 612222200

info@a4environment.org

www.a4environment.org

303 Muna Apartment,
Taleh Street, Hodan District,
Mogadishu Somalia

action4enviorn; action4environ

action4environ